

Caawinta dadka reer Alberta inay kirada iska bixiyaan

Ogoost 05, 2022

Kaalmada kirada ku meel gaarka ah ayaa gaareysa in ka badan 80 bulshood oo ku nool Alberta.

Faa'dada Gargaarka Kirada ku Meel Gaarka ah (The Temporary Rent Assistance Benefit) waxa markii hore laga bilaabay todobada xarumood ee waaweyn ee Alberta. Ku balaarinta faa'iidada bulshooyinka ku xeeran sida Eerdari (Airdrie), Foort Maklawd (Fort MacLeod), Roki Mawnteen Haawus (Rocky Mountain House) iyo Konkaliin (Conklin), dadka badan oo reer Alberta ayaa heli doona taageero si ay uga caawiso bixinta kiradooda.

"Ka faa'iidaysiga ugu wanaagsan ee taageerooyinka kiradu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah Aasaaska Xooggan: ee Qorshaha Alberta ee Istaraatiijiyada Guryeynta la Awoodi Karo ee 10 ka sano. Iyada oo la ballaarinayo Faa'idada Gargaarka Kirada ku Meel Gaarka ah in ka badan 80 bulshadood, taageero dheeraad ah ayaa diyaar u ah dadka Alberta ee u baahan caawinta in nolosha laga dhigo mid la awoodi karo inta lagu jiro sicir bararka."

Josephine Pon, Wasiirka Waayeelka iyo Guriyeynta

"Waaxyaheenna beeralayda, cuntada iyo kaymaha waxay inta badan ku saleysan yihiin bulshooyinka miyiga ah, waxaan eegeynaa deegaanada gobolka si aan gacan uga geysanno hoggaaminta soo kabashada dhaqaalaha Alberta. Waan ku faraxsanahay in Faa'idada Gargaarka Kirada ku Meel Gaarka ah lagu daro liiska tallaabooyinka aanu qaadeyno si aan nolosha uga dhigno mid u wanaagsan dadka reer Alberta ee reer miyiga ah. Taageerada kiradu waxay siin doontaa gargaar qoysaska iyo bulshooyinka la halgamaya kor u kaca kharashaadka sicir bararka waxayna kor u qaadaysaa kobaca waara ee miyiga Alberta."

Nate Horner, Wasiirka Beeraha, Dhirta iyo Horumarinta Dhaqaalaha Reer Miyiga

"Iyadoo la sii wado kordhinta cusub ee lagu dhawaaqay ee Faa'iidada Gargaarka Kirada ku Meel Gaarka ah, Maamulka Guryeynta magaalada Lasbriij (Lethbridge) ayaa hadda awood u leh inay u adeegto in ka badan 30 bulshood oo ku nool koonfur-galbeed Alberta. Waxaan uga mahadcelineynaa maalgashiga dowladda ee taageerada kirada waxaana rajeyneynaa inaan u adeegno dadka reer miyiga ee Alberta."

Robin James, CAO, Maamulka Guryeynta ee Lasbriij

"Balaarinta faa'iidada ayaa muhiim u ah hubinta fursadaha guriyeynta ee qoysas badan oo nugul oo ku nool gobolka. Haddaanu nahay hay'adda maaraynta guryaynta ee gobolka, waxay nagu noqotay caqabad dhab

ah in aynaan aqbalin macaamiil badan oo suurtagal ah kuwaas oo u qalma laakiin ka baxsan xadka magaalada. Waxaan hadda haysanaa fursad aan ku siinno caawinaad aad loogu baahan yahay qoysaska iyo dadka inta u dhaxeeya shaqooyinka kala duwan ama ay ku adag tahay in ay helaan nolol maalmeedka xilliyadan adag."

Franklin Kutuadu, CAO, Maamulka Guryeynta Red Deer

Faa'idada Gargaarka Kirada ku Meel Gaarka ah waxay qoysaska shaqeeya ee dakhligoodu yar yahay ama kuwa u dhexeeya shaqooyinka siineysaa kabad. Taageero ayaa loo heli karaa ilaa laba sano si ay uga caawiso kiraystayaasha inay awoodaan kiradooda inta ay dejinayaan ama hagaajinayaan xaaladooda.

Faa'idada waxaa lagu bixinayaa hadba sidii loo soo kala horeeyo, waxaana si toos ah loo siinayaa kiraystayaasha xaqa u leh. Qadarka faa'idada waxaa lagu go'aamiyaa tirada qoyska iyo goobta, waana ugu yaraan \$100 bishii.

Qoysaska ayaa laga yaabaa inay u qalmaan haddii ay ka hooseeyaan heerka dakhliga deegaanka ([local income thresholds](#)), hadday ay shaqeeyaan ama ay shaqeeyeen 24 bilood ee la soo dhaafay oo aysan qaadan gargaarka bulshada (ceer).

Dadka reer Alberta waxay wax badan ka baran karaan ama ka hubin karaan inay u qalmaan Khadka tooska ee alberta.ca/RentAssistance.

Xaqiiqdo degdeg ah

- Miisaaniyadda 2022 waxa ay ballan qaaday \$7.2 milyan oo ku wajahan Faa'idada Gargaarka Kirada ku Meel Gaarka ah ee 2022-23.
- Bishii Maarso 2021, dawladdu waxay dib u habayn ku samaysay Barnaamijka Kaabidda Kirada (the Rent Supplement Program) si ay u taageerto qoysas badan ugana faa'iidaysto maalgelinta federaalka. Tan waxaa ka mid ahaa bilawga Faa'idada Gargaarka Kirada Ku Meel Gaarka ah.
- Barnaamijka Kaabidda Kirada ee Alberta ee dib loo habeeyay, oo ay ku jirto faa'iidada gargaarka ku meel gaarka ah, waxa uuna u adeegaa ilaa 11,600 qoys, 3,800 ka badan intii lagu adeegi jiray barnaamijkii aasaaskiisa hore ahaa.
- Bixiyeyaasha guryaynta maxalliga ah ayaa u maamula faa'iidada ku meel gaadhka ah iyaga oo ka wakiil ah Dawladda Alberta:
 - Shirkadda Guryaha ee Calgary
 - Sifida (Civida) (Edmonton)
 - Hay'adda Garand Isbirit (Grande Spirit Foundation)
 - Maamulka Guryeynta Lasbirij (Lethbridge Housing Authority)
 - Bulshada Guryaha Bulshada ee Medesin Hat (Medicine Hat Community Housing Society)
 - Maamulka Guryaha Red Deer

- Shirkada Guryeynta iyo Horumarinta ee Wood Buffalo (Wood Buffalo Housing & Development Corporation)
- Balaarinta isticmaalka kabka kirada si si wanagsan loogu isticmaalo awooda suuqa kiraynta ee jirta waa qayb ka mid ah istaraatiijiyada guryaynta la awoodi karo ee Aasaaska Xoogan ee Alberta.

Xog la xiriirta

- Gargaar guri iyo kiro la awoodi karo ([Affordable housing and rent assistance](#))
- Istaraatiijiyad guri oo la awoodi karo oo aasaaska ka adag ([Stronger foundations affordable housing strategy](#))
- Hel guri ([Find housing](#))

Weydiimaha warbaahinta

Dylan Topal

780-886-2912

Xoghayaha Warfaafinta, Waayeelka iyo Guriyeynta

The logo for Alberta's Recovery Plan features the text "ALBERTA'S RECOVERY PLAN" in white, bold, uppercase letters. The text is contained within a white rectangular border that is partially open at the top right corner, where a yellow L-shaped graphic element is positioned.

**ALBERTA'S
RECOVERY
PLAN**

Alberta's Recovery Plan is a plan to breathe new life into Alberta's economy and create new opportunities for every Albertan. It's a plan to build, to diversify, and to create jobs.